



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Abril 22, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ra'yi ururinta kala duwanaanshaha, sinnaanshaha iyo ka mid noqoshada ee loogu talagalay fursada deeqda lacageed ee soo socda

Adeega sinnaanshuhu waa aasaaska shaqada ODDS, iyada oo [Equity North Star](#) iyo [qorshaha istiraatiijiyadeed](#) ee aanu leenahay labadooduba noo tilmaamaan caawimaada in dadka reer Oregon helaan adeegyo iyo taageero ka tirsan nidaamka. Iyada oo ah dadaal lagu xaqiijinayo in dhammaan dadka reer Oregon ay ku nool yihiin nolol hodan ah, oo buuxda, ODDS waxay u qoondeysay \$6 milyan oo ah Xeerka Qorshaha Samatabixinta Maraykanka (ARPA) si loo gaaro, loogu lug yeesho, oo iskaashi loola yeesho isla markaana taageero loo siiyo dadka la kulmay caqabado la xiriira helitaanka adeegyo iyo taageero.

Deeqda lacageed ee Kala duwanaashaha, Sinnaanshaha iyo Ka mid noqoshada ee ARPA waxay ujeedadiisa tahay xoojinta awooda u doodista dadka la kulma caqabadaha noocaasi oo kale ah. Tani waa ka mid ah balse aanay ku koobnayn dadka midabyada kala duwan leh, dadka ah [LGBTQIA2S+](#), dadka degan miyiga, iyo kuwa la kulmaya saboolnimo. Si aad nooga caawiso in aan go'aansano sida mudnaanta loo siinayo iyo sida loo qaybinayo maalgelintani, ODDS waxay raadinaysaa fikrado laga helo dadka naftooda u dooda, xubnaha ka tirsan qoysaskooda, hawl-wadaagayaashooda, daryeel bixiyayaasha, ururada bulshada, iyo kuwa kale ee ka tirsan bulshada I/DD.

Fadlan si ballaaran ra'yi ururintani dadka ula wadaag si aad nooga caawiso in aan gaarno dhageystayaasha ugu badan ee kala duwan ee suurtagalka ah. Haddii uu jiro qof ka tirsan bulshadaada oo aad u aado jawaab celin noocan oo kale ah, fadlan tani u soo dir iyaga. Waqtiga loo qabtay in lagu dhammeystiro [ra'yi ururintani](#) waa Maajo 11.

Sidoo kale, waxaad fursadaha kale ee deeqda lacageed ee soo socda ka ogaan kartaa [bogga internet-ka ARPA](#).

Waxaan kaaga mahad celinayaa fikirkaaga ra'yi ururintani iyo wixii taageero ah ee aad bixin karto ee la wadaagida nidaamyadaada dhexdooda.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.